

Sare ugu hadal caafimaadkaaga awgiis



Dhakhtaradaada iyo adeeg bixiyayaasha kale waxay u shaqeeyaan si adag si ay u caawiyaan caafimaad qab inaad ku joogto. Laakiin ma dareemi kartid qaabkaas haddii ay dhib kaa haysato is fahanka. Ka hor ballanta, u diyaar ahow inaad ka hadasho wax ku saabsan waxa adiga kuu muhiimka ah. Akhri si aad u bilowdo.

Samee liis ka hor ballantaada

Ka hor inta aanad booqan adeeg bixiyahaaga, waydii naftaada qaybo su'aalo ah:

- Waa maxay hadafyadayda caafimaadku?
- Waa maxay astaamaha aan doonayo inaan u sheego adeeg bixiyahayga wax ku saabsan?
- Ma jiraa wax dhibaatooyin kale ah ama walaacyada aan doonayo inaan soo qaado?

Ku qor su'aalahaaga dhinaca kale ee warsidaha.

Samee liis kale oo adeeg bixiyayasha ah iyo dhakhtarada takhasuska leh ee aad dhawaan aragtay. Ku dar adeeg bixiyayaasha aad ka fekerayso wax ku saabsan araga, sidoo kale. Sii adeeg bixiyahaaga liiskan. Isaga ama iyadu waxa uu hubsan doonaa inuu ku xidho daryeelkaaga adeeg bixiyayaasha kale.

Go'aan ka gaadh waxa aad ka doonayso booqashadaada

Marka xigta, ka feker wax ku saabsan waxa aad doonayso inaad kala soo baxdo booqashadaada. Uga sheeg adeeg bixiyahaaga si toos ah waxa aad filayso. Waydii isaga ama iyada wax ay adiga kaa filayso. Tani waa tallaabada koowaad ee wanaagsan ee qaadashada doorka firfircoon ee daryeelkaaga caafimaadka.

U sheeg adeeg bixiyahaaga inta wakhtigu yahay aad u baahan tahay booqashadaada. Waa sax in ballan kale la sameeyo haddii aad u baahan tahay wakhti dheeraad ah oo aad ku waydiiso dhammaan su'aalahaaga.

Ku celi waxaad maqashay

Way adkaan kartaa in la xasuusato waxa adeeg bixiyahaagu kuu sheego adiga. Tani gaar ahaan waa run marka aad dareemayso jiro ama werwer. Hubso inaad fahanto addoo leh, "Mahadsanid inaad bixisay macluumaadka. Hadda, aan arko haddii aan fahamayo. Waxaan maqlay adoo leh . ." Waa sax in la waydiiyo adeeg bixiyayaashada inay lafahoodu ku celiyaan.

Qoraalo qor. Ka dib booqashadaada, akhri qoraaladaada oo dib u eeg waxaad baratay.

[guudka →](#)

Su'aalaha ku saabsan jirada ama cudurka:

- Khatar ma ugu jiraa jirooyinka qaar ama cudurada? Kuwee?
- Maxaan samayn karaan si aan u caafimaad qabo? Waa maxay tallaabooyinka yaryar ee aan ku bilaabi karo?
- Maxaa faraq samayn doono haddii aan cuno cuntooyin ka caafimaad badan? Bal ka waran jimicsiga? Li sheeg wax ku saabsan qaababka yar ee aan ku bilaabi karo.

Su'aalaha ku saabsan cudur baadhidayda:

- Maxaa sababi kara xaaladan?
- Joogto ma ahaan doontaa?
- Sidee dhakhaatiirtaydu ii caawin karaan inaan ku daweeyo oo ku maareeyo xaaladan?
- Ma ku sababi doontaa saamayn wakhti dheer ah qaab nololeedkayga? Haddii ay sidaasi jirto maxaan filan karaa?

Maxaan doonayaa inaan waydiiyo adeeg bixiyahaga? Su'aalaha ku saabsan dawooyinka:

- Waa maxay saamaynta xun ee guud?
- Dawadan ma faragelin doontaa dawooyinkayga kasta oo kale?
- Goorma ayay dawadu shaqada bilaabi doontaa?
- Maxaan samaynayaa haddii aan seego garoojada dawada?

Su'aalaha ku saabsan baadhitaanada caafimaadka:

- Sababtee ayaynu u samaynaynaa baadhitaankan?
- Sideen u diyaar garoobayaa?
- Goorma ayaan helayaa natiijooyinka?

Su'alaha ku saabsan daawaynta:

- Waa maxay doorashoyinkaygu?
- Waa maxay khasaaraha iyo faa'iidada doorashooyinkaygu?
- Ma jiraan daawayn kale oo aan ka fekerayaa?

Maxaan doonayaa inaan waydiiyo adeeg bixiyahaga?

1. _____
2. _____
3. _____

Maxaan samayn karaa si aan u horumariyo caafimaadkayga?

1. _____
2. _____
3. _____

Sideen ugu diyaar garoobaa booqashadayda xigta?

1. _____
2. _____
3. _____

Bulshadda Ilkaha ODS

